Portland Clean Energy Community Benefits Fund (PCEF, Sanduuqa Gunnooyinka Bulshada ee Tamarta Nadiifta ah ee Portland) ayaa bixisa lacag gaar u ah talaabada cimilada taasoo hormarinaysa cadaalada isirka iyo bulshada. Asagoo ah sanduuqii ugu horeeyay ee gobalku u abuuro cimilada ayna hogaaminayaan bulshooyinka aan cadaanka ahayn, PCEF waxaa loogu talagalay oona abuuray bulshada. PCEF waxaa ucdub dhexaad u ah dadka madoowga ah iyo kuwa Asaliyiinta ah, iyo kooxaha kale ee taariikhuyan la hagran jiray marka laga hadlaayo dhibaatooyinka cimilada.

Waxay u baahan tahay waa fikirkaaga inaad ku biiriso. Maaha in talaabo kasta ay noqoto mid si aad saamayn ugu yeelato cimiladeena iyo bulshooyinkeena. Barnaamijka Deeaqda Yar ee PCEF ayaa ah deeq rubuc ah oo lagu bixinaayo $5,000 nashaadaadka waafaqsan higsiyada PCEF ee kahortaga isbadalka cimilada iyo hormarinta cadaalada isirka iyo bulshada. Asagoo lagu abuuray jawaab laga bixinaayo falcelinta bulshada, Deeqaha Yaryar ayaa fursad u siiya ururada inay maal gashaan nashaadaad badan iyo adeegsiyo, ayna ku jiraan mashaariic yaryar, munaasabado, tababar, iyo mushaarka waqtiga shaqaalaha. Ururada dhammaan noocyada kaladuwan ayaa u qalma inay codsadaan. Muhiimada waxaa la siinayaa ururada yaryar ee astaanta u ah ayna hogaanshaan bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF.

Xog badan ka ogoow Deeqaha Yaryar ee PCEF: Lifaaqa Webseedka Deeqaha Yaryar

Si ad u gudbiso codsigaaga adoo adeegsanaaya codsiga oonleenka ah, raac lifaaqaan: Lifaaqa Webseedka Codsiga Deeqaha Yaryar

1. XOGTA URURKA

** Haddii aad adeegsanayso maal geliyaha lacagta si aad u codsato, fadlan buuxi qaybtaan la xariirta kooxda aad matalayso. Xogta maal gelinta dhaqaale ayaa lagu aruurinayaa bogga xigga. Bogaan ku dhaaf lambarka EIN.*

Magaca Ururka:

Lambarka EIN:

Magaca koobaad iyo kan ugu danbeeya ee cida lagala xariiraayo:

Ciwaanka Iimeelka Lagala Xariiraayo:

Lambarka taleefanka qofka lagala xariiraayo:

Maal Gelinta Dhaqaale

** Haddii aad isticmaalayso maal geliya dhaqaale si aad u codsato, fadlan ku qor xogtiisa hoos. Haddii kale, ayadoo faaruq ah iska dhaaf oo aad su'aasha xigta*

Magaca u diiwaan gashan maal geliyaha lacagta:

Lambarka EIN:

Magaca koobaad iyo kan ugu danbeeya ee cida lagala xariiraayo:

Ciwaanka Iimeelka Lagala Xariiraayo:

Lambarka taleefanka qofka lagala xariiraayo:

Ururkaagu ma u diiwaan gashan yahay mid khayri ah oo hadda shaqeeya, ama waa mid qorshaynaaya inuu shaqeeyo, kaasoo faa'iido u leh dadka dagan Magaalada Portland?

** Tani waa shardi muhiim u ah u qalmida. Haddii aan codsigaagu buuxin shardigaan, uma qalmi doono fursadaan deeqda.*

☐ Haa ☐ Maya

☐ Ma hubo? Fadlan sharax:

2. QEEX URURKAAGA

2.1 Meeqa boos shaqooyinka shaqaalaha sanadka oo dhan ayuu ururkaagu shaqaalaysiiyaa?

** Haddii aad tahay urur ay maamulaan dad mutadawiciin ah, fadlan ku jawaab "0".*

** Uma baanid inaad ku darto shaqooyinka xiliyada gaarka ah.*

** Haddii aad adeegsanayso maal geliye dhaqaale, fadlan sheeg xogta kooxda aad matalayso, maaha maal geliyaha dhaqaalaha.*

Shaqooyinka shaqaalaha sida buuxda u shaqeeya:

Shaqooyinka shaqaalaha nus kamid ah waqtiga shaqeeya:

Bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF

Bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF waxaa kamid ah:

- Dad aan cadaan ahayn
- Dadka danyarta ah
- Dadka naafada ah
- Dadka loogu yeero haweenka, labeebka, nimoow naaga, ama labo dareenaha

2.2 Inta badan dadka ururkaagu u adeeggo ma ka mid yihiin mid kamid ah ama ka badan ururadaan?

☐ Haa ☐ Maya

☐ Ma hubo? Fadlan sharax:

2.3 Kooxdee ayaa ah dadku ugu badan ee ururkaagu u adeeggo?

** Calaamadee dhammaan meelaha ku quseeya*

☐ Dad aan cadaan ahayn

☐ Dadka danyarta ah

☐ Dadka naafada ah

☐ Dadka loogu yeero haweenka, labeebka, nimoow naaga, ama labo dareenaha

2.4 Intee kamid ah shaqaalaha ururkaaga iyo gudigga ayaa muujinaaya bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF ee aad u adeegto?

☐ Inta badan: In ka badan wadarta guud ee shaqaalaha ururkeena iyo gudigga ayaa muujinaaya bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF ee aan u adeegno.

☐ Wax ka yar nus: In ka yar 50% wadarta guud ee shaqaalaha ururkeena iyo gudigga ayaa muujinaaya bulshooyinka muhiimada lagu siinaayo PCEF ee aan u adeegno.

2.5 Ururkaagu (ama maal geliyahaaga dhaqaaluhu) ma leeyahay caymis caafimaad?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma hubo

* Su'aashaan wax saamayn ah kuma lahan u qalmidaada ama fursadaha lagugu xulan karo. Deeq qaatayaasha la doorto ayaa laga dooni karaa inay keenaan cadaynta caymiska, ayadoo ku xiran shaqooyinka la maal gelinaayo. Haddii lagu xusho, shaqaalaha ayaa kuu sharxaaya shuruudaha caymiska ee qabanaaya deeqdaada.

3. SU'AALAHA WARINTA AH

Qorshaha Deeqda

Qaybtaan waxaan kaaga codsanaynaa inaad qeexdo waxa aad qorshaynayso inaad ku samayso lacagta deeqda haddii lagu xusho.

* Halkaan waxaad ka helaysaa dhawr su'aalood oo ku hagaaya si aad iskugu daydo inaad ka jawaabto:

- Waa maxay fikirka sawirka guud ee codsigaaga maal gelinta?
- Sidee ayay deeqdaan u caawnaysaa ururkaga?

3.1 Qeex qorshahaaga: *(Mudada lasoo jeediyay: 100 eray)*

Yoolalka PCEF

** Qaybtaan, waxaan ku waydiin doonaa inaad qeexdo xariirka u dhexeeya soo jeedintaada iyo higsiyada PCEF ee wax ka qabashada isbadalka kimilada iyo hormarinta cadaalada isirka iyo bulshada.*

** Inay wax wadaagaan codsigaaga iyo yoolalka PCEF ayaa ah shardi muhiim u ah u qalmida. Haddii aan codsigaagu buuxin shardigaan, uma qalmi doono fursadaan deeqda.*

**Halkaan waxaad ka helaysaa dhawr su'aalood oo ku hagaaya si aad iskugu daydo inaad ka jawaabto, ayagoo loo qoray noocyada kaladuwan ee codsiyada maal gelinta:*

- Taageerada deeq qorista - waa maxay noocyada deeqaha aan doonayno inaan soo gudbino iyo sida ay ula xariiraan higsiyada PCEF? Haddii aan helno taageerada qorista deeqda, sidee ayay guul dheeraad ah uga siinaysaa ururkeena wax ka qabashada isbadalka cimilada ee mustaqbalka.
- Mashruucyada - Muxuu guul ka gaari doonaa mashruuceenu? Sidee ayuu mashruuceenu u taageerayaa bii'o caafimaad qabata ee bulshooyinka aan u adeegno?
- Isku xirka bulshada - Dadkee ayaan isku dayaynaa inaan gaarno waase maxay sababtu? Sidee ayay isku xirka bulshadu u taageeraysaa cadaalada isirka iyo bulshada? Qofkee ayaan u baahan nahay inaan maqalno sheekadiisa si aan fahan fiican uga helno saamaynada isbadalka cimilada iyo xalalka la heli karo.
- Tababarka - Muxuu tababarku barayaa ururkeena? Sidee ayuu tababarku fursad fiican u siinayaa ururkeena si wax looga qabto isbadalka cimilada iwaxna looga qabto cadaalada isirka iyo bulshada mustaqbalka danbe?

3.2 Sidee ayuu codsigaan maal gelintu u waafaqsan yahay higsiyada PCEF ee xal u helida isbadalka cimilada iyo hormarinta cadaalada isirka iyo bulshada? *(Mudada lasoo jeediyay: 150 eray)*

4. CODSIGA MAAL GESHIGA

** Qaybtaan, waxaan kaa codsanaynaa inaad faahfaahin ka bixiso codsigaaga maal gelinta. Ka fakar codsigaaga iyo sida aad u qorshaynayso inaad u adeegsato lacagta haddii lagu xusho. Akhri su'aal kasta oo hoose. Tig saar bokiska ku xiga qaybaha maal gelinta ee la xariira*

qorshahaaga. Ayadoo faaruq ah ka tag haddii qaybta maal gelintu aysan la xariirin soo jeedintaada.

** Codsiga maal gelinta wadarta guud ee qorshahaagu waa inuu yahay $5,000 ama kayar.*

** Bokis kasta ood hubiso, fadlan noo sheeg cadadka maal gelinta aad ku codsanayso qaybtaas iyo sida aad doonayso inaad u adeegsato maal gelinta.*

☐ **Iibsiga Badeecooyinka**
**Tusaalayaasha: waxyaabaha la daabaco, munaasabadaha cuntada, iibsiga agabka tignooloojiyada, ku xirnaanshaha webseedka, agabka beer falida iyo xogta, qalabka ...*

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $ ☐

Maxaad iibsan lahayd? Sidee ayaad qorshaynaysaa inaad u adeegsato waxyaabahaan? *(Qor liiska agabka iyo sababta aad u doonayso inaad sheygaas gadato.)*

☐ **Waqtiga Shaqaalaha iyo Ka qaybgalka Bulshada - Wada shaqaynta Bulshada, Munaasabadaha, iyo Mashruucyada**

**Tusaalayaasha: CMunaasabada iskuxirka bulshada, bandhigyada waxbarashada, hogaaminta safarada gaaban, qabashada xaflada beerta, siinta mushaar bulshada ka qaybgasha barnaamijka ...*

** Codsashada maal gelinta ee qaybtaan ayaa u baahan heerar aad u sareeyo oo caymis ah marka loo eego qaybaha kale ee maal gelinta.*

** PCEF waxay ka doonaysaa mushaaraadka shaqaalaha ee lagu baxsho lacagta deeqda PCEF lagu baxsho 180% mushaarka ugu yar, oo hadda ah $25.20/saacadii.*

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $ ☐

Sidee ayaad qorshaynaysaa inaad u adeegsato maal gelinta. Maxay shaqaaluhu samayn doonaan?

☐ **Waqtiga shaqaalaha - Hormarinta Ururka (Shaqada aan bulshada lagu waajahayn)**

Tusaalayaasha: Mushaar ku siin shaqaalahaaga qorista deeqaha, iyo fulinta qorshaynta ama cilmi baarista mashruuca, samaynta shaqooyinka maamulka...

** PCEF waxay ka doonaysaa mushaaraadka shaqaalaha ee lagu baxsho lacagta deeqda PCEF lagu baxsho 180% mushaarka ugu yar, oo hadda ah $25.20/saacadii.*

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $

Sidee ayaad qorshaynaysaa inaad u adeegsato maal gelinta? Maxay shaqaaluhu samayn doonaan?

☐ **Qarashaadka Xaadirista Tababarka, Aqoon Kororsiga, iyo Waxbarashada**

Tusaalayaasha: Mushaar ku siin shaqaalahaaga ka qaybgalka aqoon korosiyada, ka qaybgalka tababarka, ka qaybgalka shirarka, ka qaybgalka casharada awood dhisida ...

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $

Sidee ayaad qorshaynaysaa inaad u adeegsato maal gelinta? Sidee ayay awood dhisidaan ula xariirtaa talaabada cimilada?

☐ **Adeegyada Qadaraaska**

Tusaalayaasha: Bixinta mushaarka qofka deeqda qoraaya, adeegyada turjumaanka iyo fasiraada, aqoon kororsiyada iyo fulinta kulannada, adeegyada naqshadaynta jaantuska, farshaxaniistaha/jilayaasha, caawimaad farsamo, qiimayno, isla xisaabtanka tamarta ...

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $

Waa maxay adeegyada aad qandaraaska ku bixinayso? Muxuu qandaraasluhu samayn doonaa?

☐ **Wax kale**

Ma dirtay codsiyo kale oo maal gelin oo la xariira codsigaaga oon marhoraba kor lagu sheegin, fadlan halkaan ku qeex.

Cadadka Maal gelinta lagu codsaday qaybtaan: $

Fadlan qeex waxa aad doonayso inaad dhiibto iyo ujeedada iibsiga.

WADARTA GUUD EE CODSIGA DEEQDA: $

** Iskudar lacagta mid kasta oo kamid ah qaybaha kore.*

** Wadarta guud ee cadadka la codsaday (waa inuu yahay $5,000 ama kayar)*

5. Dor codsigaaga!

Markaad buuxiso dhammaan qaybaha kore, fadlan iimeel ugu dir dukumiintigaan oo lifaaq ah ciwaanka PCEFminigrants@portlandoregon.gov. Waxaan diri doonaa iimeel xaqiijinaaya helitaanka codsigaaga.